# Meelaha maadooyinka khatarta ah – Xarumaha Seveso ee ku yaal Göteborg

Waxaad halkaan ku helaysaa warbixin ku saabsan waxaad samayn kartid haddii shil dhaco – tusaale ahaan haddii dab wayn kaco ama sun/wasakh hawada lagu sii daayo – taas oo dhici karta haddii mid ka mid ah shirkadaha maareeya xaddi badan oo maadooyiinka khatarta ah ee ku yaal Göteborg shil ka dhaco.

## Maxaad ugu baahan tahay warbixintaan?

Göteborg waxaa ku yaal tiro shirkado ah oo maadooyin khatar ah shaqadooda u isticmaala, maadooyin dadka iyo deegaankaba khatar ku ahaan kara. Shirkadaha maareeya maadooyinka khatarta ah oo xaddi badan waa inay raacaan shuruuc gaar ah iyo sharciyo la xiriira amniga, oo uu ka mid yahay Sharciga ka hortagga shilalka iyo shuruucda gaarka ah ee Seveso.

Adiga deggan meel u dhow goob lagu maareeyo waxyaalo noocaas ah waxa sida uu sharcigu dhigayo xaq u leedahay inaad heshid warbixin ku saabsan shirkadaha kuwa ay yihiin, maadooyinka ay maareeyaan iyo khataraha la xiriira. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad ogaatid waxaad samayn lahayd haddii shil dhaco – tusaale ahaan haddii dab wayn kaco ama sun/wasakh hawada lagu sii daayay – kaas oo ka dhacay mid ka ah xarumahaas.

Waxaa sidaas darteed adiga nawaaxiga deggan ama hawlo ganacsi ku leh ay ahayd inaad heshid waraaqo/buug warbixin ah oo af iswiidhish ku qoran oo boostada gurigaaga lagugu soo diro. Waxaad boggan ka akhrin kartaa qoraalo warbixin ah oo la turjumay.

## Waa maxay Seveso?

Juulay 1976 waxaa dhacay musiibadii Seveso ee ka dhacday magaalada Seveso ee ku taal Talyaaniga. Maado sun ah ayaa hawada gashay oo kasoo baxday meeshii lagu keydinayay oo ahayd warshad yar oo kiimiko lagu sameeyo. Shilku wuxuu keenay in qaraar ujeedadiidu tahay in lagu ilaaliyo shacabka haddii uu dhaco shil kiimiko. Qaraarka waxaa lagu dabbaqay sharciga Iswiidhan.

## Sidaan ayay khatarahaan saamayn kugu yeelanayaan

Xarumaha Saveso waxay maareeyaan maadooyin leh sifooyin kala duwan oo khatar ah. Haddii dab kaco ama maadooyin sun ah hawada lagu sii daayo, waxay taasi keeni kartaa caawaaqib xun. Khataraha qaar badan oo ka mid ah waa kuwo sidaas oo ay tahay ku eg

deegaanka xaruntu ku taal. Waxaa sidoo kale qaar badan oo ka mid ah xarumahaas ku yaalliin goobo xoogaa u jira halka dadku ku sugan yihiin.

Waxay taasi la micne tahay in halista inuu toos kuu saameeyo shil ka dhaca mid ka mid ah xarumahaas uu yar yahay. Halista ugu wayn waa dababka waawayn ama khataraha in maadooyin gaas ah ay hawada galaan – waxaa taas loola jeedaa wixii ku saamayn kara xattaa haddii aad ka fog tahay meesha xaruntu ku taal.

## Shirkadaha ku yaal Göteborg ee maareeya maadooyinka khatarta ah ee xaddigoodu badan yahay

Shirkadaha Seveso ee ku yaal Göteborg waa kuwa saliidda sifeeya, xarumaha alaabaha kala gudbiya (loojoostiko), kuwa midabada sameeya, xarumaha keydka shidaalka iwm. Waxay maareeyaan maadooyin khatar ah oo xaddigoodu badan yahay waxaana sidaas darteed qabanaya sharciga Saveso. Ujeedada laga leeyahay waa in laga hortago oo la xadido dhaawacyada ka dhalan kara haddii shil kiimiko oo halis ah dhaco.

## Doorka hey´adda badbaadada

Hey´adda badbaadadu waxay ka shaqaysaa sidii looga hortagi lahaa shilalka xun oo adiga deggan ama ka hawlgala Göteborg aad u dareentid nolol amni ah. Ayadoo lala kaashanayo guddiga gobolka ayay hey´adda badbaadadu waxay kontorool ku samaysaa shirkadaha Seveso ee ku yaal Göteborg inay sharciga iyo shuruucda amniga la xiriira raacaan.

Hey´adda badbaadada Storgoteborg (Yotoboorida wayn) waxay diyaar u yihiin afar iyo labaatan saac inay maareeyaan wargelinada shilalka degdegga ah. Waxay leeyihiin shaqaale aqoon gaar ah u leh iyo qalab si ay u maareeyaan shilalka la xiriira maaraynta kiimikada.

Hey´adda badbaadadu way sii qorsheeyaan oo usii tababartaan iyagoo sidoo kale la kaashanaya shirkadaha Seveso inay u diyaargaroobaan maaliintii loo baahdo. Hey´adda badbaadadu sida sharcigu dhigayo waxaa waajib ku ah inay dejiyaan qorsheyaal badbaado oo loogu talo galay shirkadaha Seveso. Qorsheyaashaan dib baa loo eegaa oo dib baa loo cusboonaysiiyaa si joogto ah waxaana lagu tababartaa ugu yaraan saddexdii sanaba mar.

Dhammaan shirkadaha waxay ka shaqeeyaan inay ka hortagaan oo xadidaan shilalka. Xarumuhu waxay leeyihiin nidaam adag oo la raaco shaqaalahana waa la baraa oo lagu tababaraa si joogto ah.

## Sidaan ayaad ku ogaanaysaa inuu shil dhacay

Haddii shil wayn oo maadooyin khatar ah uu dhaco waxaad ku ogaanaysaa sistamka VMA – farriinta muhiimka ah ee bulshada ku socota. VMA waxaa laga sii daayaa Tv-ga iyo raadiyaha waxaana laga arkaa boggaga telefashinka iyo raadiyaha Iswiidhan, iyo

sidoo kale krisinformation.se iyo apapka ku jira telefoonkaaga casriga ah, tusaale ahaan app-ka SOS Alarm.

VMA waxaa sidii sms loogu soo diraa telefoonada gacanta ee ku sugan nawaaxiga shilku ka dhacay. Uma baahnid inaad soo sheegtid lambarkaaga si aad farriinta u heshid.

Farriinta waxaa sidoo kale lagu kaabi karaa digniinta bannaanka ”Viktigt meddelande [Farriin muhiim ah]” oo sidoo kale loogu yeero ”Hesa Fredrik”. Waa cod kor u qaylinaya oo bannaanka laga maqlo. Digniinta bannaanka waxaa loo isticmaalaa meelaha uu saamaynayo haddii shil dhaco waxaana la isticmaalaa xaaladaha sida gaarka ah degdegga u ah.

## Sidaan samee markii aad maqashid digniinta bannaanka

Digniinta bannaanka ”Viktigt meddelande [Farriin muhiim ah]” waa dhambaal ka kooban cod 7 ilbiriqsi soconaya oo ay ku xigto 14 ilbiriqsi oo aamusnaan ah. Waxaa taas lagu celcelinayaa ugu yaraan 2 daqiiqo.

Sidaan samee markii aad maqashid digniinta:

» Gudaha gal

» Dhagayso Raadiyaha Iswiidhan P4 ama akhri krisinformation.se

» Albaabada iyo daaqadaha xir iyo haddii ay suurtagal tahay hawo qaadda.

» Ha u bixin bannaanka illaa aad ka maqashid dhambaalka khatartii way dhammaatay, dhambaal 30-40 ilbiriqsi oo isku xiran soconaya.

Digniinta bannaanka ”Viktigt meddelande [Farriin muhiim ah]” waxaa la tijaabiyaa rubi saaciiba mar. Waxay taasi la sameeyaa saacadda 15:00 isniinta aan fasaxa ahayn ee ugu horraysa bilaha maarso (maaris), juun, sebtembar iyo diisambar.

## Sidaan ayaad samaynasaa haddii aad qiiq ama qiiq gaas ka kacay aad dhex gashid

- Qiiqu ama gaasku wuxuu leeyahay ur aad loo dareemayo oo xanfaf indhaha iyo sanka ku keenaya iyo sidoo kale cunaha oo dhibsanaya iyo qufac.
- Waxaad si kumeel gaar ah hawada u qaadan kartaa haddii aad ku neefsatid istaraasho (maro) qoyan.
- Ku fikar dhanka dabayshu ka socota! Ka tag meesha shilku ka dhacay. Dhanka dabayshu ka imaanayso dhankeeda kale aad.

# Waxaad halkaan ka helaysaa warbixin intaa dheer oo ku saabsan xarumaha Seveso

Bogga hey´adda badbaadada **rsgbg.se/seveso** waxaad ka helaysaa xog faahfaahsan oo ku saabsan xarumaha kala duwan ee Seveso ee ku yaal Göteborg, maadooyinka khatarta ah ee ay maareeyaan iyo sidoo kale meelaha laga la xiriiro.

Warbixin ku saabsan indho ku haynta xarumaha Seveso waxaa maamulka gobolka looga dalban karaa emaylka **vastragotaland@lansstyrelsen.se**

Hey´adda dawladeed ee diffaaca bulshada iyo diyaargarowga, MSB, waxaa laga helayaa warbixin ku saabsan shuruucda Seveso oo ku jirta boggooda: **msb.se/seveso**

Waxaad sidoo kale Göteborgs Stad ka wici kartaa **telefoonka 031-365 00 00**